



**WAR MURTIYEEDKA SHIRKA WADATASHIGA DAKHLI WADAAGGA
KALLUUMEYSIGA DALKA IYO DIB-U-EEGISTA SHARCIGA KALLUUMEYSIGA
SOOMAALIYA**

Mogadishu, Somalia December 12, 2020

Shirka dakhli wadaaga kalluuka dalka oo ay ka soo qeybgaleen Wasiirada Kalluumeyysiga iyo Kheyraadka Badda DFS, iyo Wasiiradda Wasaaradaha Kalluumeyysiga Dowlad Goboleedyada Galmudug, K/Galbeed, Hirshabeele iyo Gobolka Banaadir ayaa lagu qabtay magaalada Muqdisho 10-ka ilaa 12-ka Bisha December 2020, si ay wada hadallo uga yeeshaan heshiiska dakhli wadaagga kalluumeyysiga dalka iyo dib-u-eegista sharciga kalluumeyysiga Soomaaliya.

Shirkan oo ujeeddadiisu ahayd sii xoojinta howsha socota ee dakhli wadaagga kalluumeyysiga dalka iyo dib-u-eegista sharciga Kalluumeyysiga Soomaliya ayaa lagu go'aansaday qodobadan soo socda:

1. In Wasaaradda Kalluumeyysiga iyo Kheyraadka Badda DFS ay dardar-geliso dhammaystirka sharciga kalluumeyysiga si dhaqso ahna loogu gudbiyo Golaha Wasiirada DFS si ay u meel mariyan uguna gudbiyaan Golaha baarlamaanka.
2. In la mideeyo dhammaan Siyaasadaha Kalluumeyysiga Soomaaliya, kadib marka ay isku waafaqaan dowalda dhexe iyo dowlad goboleedyada.
3. Waxaa si buuxda Wasiiradu u go'aansadeen in muhiimad gaar ah la siiyo maareynta iyo tashiiinka kheyraad badeedka, lagana hortago wax kasta oo dhibaato u keeni kara noolaha iyo deegaanka badda oo ay ku jiraan hababka Kalluumeyysiga ee waxyeellada leh
4. In DFS oo kaashanaysa Dowlad Gobolledyada ay dadaal ku bixiso ka hortaga Kalluumeyysiga sharci darada ah ee ka dhaca biyaha Soomaaliya.
5. Waxaa la isla gartay saameynta COVID 19 awgii aynan suuragalin in la fuliyo dhammaan qodobadii ku xusnaa heshiiskii hore



6. Waxaa la isku raacay ilaa inta laga helayo heshiis rasmi ah oo beddela hesiishkii hore oo waqtigiisu ku ekaa Septemper 2020 in Wasaaradda kalluumeysiga iyo Khayraadka Badda DFS ay sii waddo bixinta shatiyada iyo soo xareynta dhaqliga kalluumeysiga kaa soo lagu haynayo Bangiga dhexe ee dalka.
7. In bisha January 2021 dhexdeeda Magaalada Dhuusa-Mareeb ee caasimadda dowlad gobolleedka Galmudug ay shir wadatashi isugu yimaadaan dowladda federalka, dowlad goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir si loo gaaro heshiiska dakhli wadaaga Kalluumeysiga Soomaaliya.

Saxiixayaasha War murtiyeedka

Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda DFS

Mudane Xil. Abdullahi Omar Abshir

A handwritten signature in black ink, appearing to read "Abdullahi Abshir".

Wasiirkha Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda ee Galmudug

Mudane Xil. Abdi-Sabir Nur Shurie

A handwritten signature in black ink, appearing to read "Abdi-Sabir Nur Shurie".

Wasiirkha Xil. Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda ee Hirshabelle

Mudane Xil. Iidle Siyaar Sheikh Khalifa

A handwritten signature in black ink, appearing to read "Iidle Siyaar Khalifa".

Wasiirkha Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda ee Koonfur Galbeed

Mudane Avv. Cabdiqani Cabdullaahi Maxamed

A handwritten signature in black ink, appearing to read "Cabdiqani Cabdullaahi Maxamed".

-- Dhammaad --